

Dhalashada ilaa Lix Jirka – Koritaanka iyo Koboca

Fadlan Weydii. Ciyaalku Ma Sugi Karaan.



Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES

Maxay

Shaxda waxaa loo qoray waalidiinta, laakiin qof kasta oo yaqaan ama la shaqeeya carruurta yar-yar wuxuu u arki doonaa mid waxtar leh.

Sababta

Shaxdan hore ee shaashadda waa hab deg-deg ah oo kaa caawinaysa inaad garato meelaha dhibka ka iman kara ee aragga, maqalka iyo koritaanka. Shaxda ayaa kaa caawin doonta inaad eegto ilmaha oo dhan. Waxaad ka daawan doontaa koritaanka ilmaha dhinacyada fikirka, xirfadaha bulshada, dhegeysiga, hadalka iyo dhaqdhaqaqa hawlahaa. Xirfadaha dhaqdhaqaqa qaarkood waxay isticmaalaan muruqyo yaryar (sida faraha), qaar kalena waxay isticmaalaan muruqyo waaweyn (sida lugaha). Waa muhiim in la daawodo aragga iyo maqalka carruurta da'kasta.

MUHIIM! Jaantuskani waa hab deg-deg ah oo kaa caawinaya inaad la socoto aragga, maqalka iyo korriinka ilmahaaga, loogumana talagelin inay noqoto baadhis koriin, qiimayn ama lasocosho.



Sidee

Qayb kasta oo da' kastaa waxay taxdaa waxqabadyada ay carruurta badankoodu awoodi doonaan inay qabtaan inta u dhaxaysa da'da koowaad iyo da'da labaad ee qaybtaas. Tusaale ahaan, 12 bilood, carruurta badankoodu waxay awoodi doonaan inay qabtaan dhammaan hawlahaa kujira liiska 6 ilaa 12 bilood ee qaybta. Si kastaba ha ahaatee, carruurta badankoodu ma awoodi doonaan inay qabtaan dhammaan hawlahaa 6 bilood. Isla sidaas oo kale waa run qaybta da' kasta. Sidaa darteed, aad ha uga wel-welin haddii ilmuu bilawga heerka da'da uusan qaban karin dhammaan hawlahaa. Maadaama caruurtu ku koraan heerar kala duwan, ha argagixin sababtoo ah ilmuu wuxuu u muuqdaa mid gadaal kahaya hal hawl.

Akhri waxqabadyada ku taxan da'da ilmaha oo ay kujiraan aragga iyo maqalka. Daawo oo dhegayso markuu ilmuu ciyaarayo. Ilmuu ma samayn karaa hawlahaa? Waa muhiim in ilmuu uu haysto wakhtiga, goobta iyo agabka uu u baahan yahay marka uu qabanayo hawl kasta. Tusaale ahaan, ha odhan in ilmuu ma sawiri karo weji haddii aanad siin ilmaha warqad iyo qalin ama kalar.

Waxaa laga yaabaa inaad rabto inaad daawato oo aad dhegaysato ilmo dhawr maalmood, adoo isticmaalaya shaxanka muujinaya walaac kasta oo aad qabtid. Haddii ilmaha da'da sare ee qaybta aanu samayn karin dhammaan hawlahaa, qoysasku waxay la wadaagi karaan indha-indheyntooda xirfadle si dhow u eegi kara koritaanka ilmaha.

Goorta

Daawo oo dhegayso ilmaha markuu ciyaarayo. Waxaad raadinaysaa sida ilmuu caadi ahaan yahay. **Ha isticmaalin shaxdan marka ilmuu buko, daalan yahay ama xanaaqsan yahay.**

Maxaa Xiga

Waxaad wici kartaa lambarka Help Me Grow Washington ee ku qoran dhanka kale ee daabacaadan magaca Family Resources Coordinator (Isuduuhaha Kheyraadka Qoyska, FRC) ee Hogaanka deegaanka ee goobaha haddii aad ka wel-welsan tahay koritaanka ilmaha. Sidoo kale, dhakhtarka ilmaha, waaxda caafirmaadka ama dugsiga degmada ayaa caawin kara qoysaska oo waxaad raadin kartaa wakaaladda kuu dhow oo samayn karta hubin dhamaystiran oo ku saabsan koritaanka ilmaha, aragga iyo/ama maqalka.



Araga

Miyuu canugaagu...

- Sameeyaa xarakaadka indhaha (fiiriya indhahaaga)
- La raacaah shay dhaqaqaqaya indhihiisa
- Socdaa ama guurguurtaa isagoon badanka ku boodday ashyaada
- Ku fiiriya dadka iyo ashyaada labada indhoodba
- Qabtaa ashyaada u dhow (ka dib da'da 6 bilood)
- U socdaa ama u guurguurtaa si degan meelaha madow ama qariibka ah (rooga, marmarka)
- Fiiriya dadka iyo waxyabaha isagoon isdhafineyn indhaha ama isku haya (ka dib 9 bilood)
- Leeyahay indho waadixa, oo aan caseyn ama biyo lahayn

Maqalka

Miyuu canugaagu...

- Ka warqabaa codadka guriga (teleefanka, garaaca albaabka, telefishanka)
- Istimaalaa cod aan aad u weynayn ama aad u dabacsan
- Ku ciyaraa baanbolo sameysa cod (shabaxshabax, dhow)
- Ku daydaa codadka (kadib 1 sano)
- Istimaalaa kalmadaha ku dhamaanaya ("s" ama "ing") ka dib da'da labo
- Raacaa tilmaamaha hadalka
- Ilaliyaa cod dhedhexaada telefishanka ama raadhiyowga
- Dhageystaa sheekoyinka, diwaanada, ama telefishanka isagoonay ku adkayn
- U hadlaa si dadka badankiisu fahmi karaan (haddii uu ka weyn yahay 2-1/2 sano)
- Kuu imadaa markaad uga yeedhid qol kale (kadib 2 sano)



Dhalashada ilaa Lix Jirka – Koritaanka iyo Koboca

Fadlan Weydii. Ciyaalku Ma Sugi Karaan.



Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES

Waalidka:

Waalid ahaan, waxaad tahay qofka ugu muhiimsan ee nolosha ilmahaaga. Si ficanayaad u taqaanaa canugaaga. Haddii aad walaac ka qabto koritaanka ilmahaaga, waxaad codsan kartaa qiimayn. Fadlan weydii haddii aad wax su'aalo ah ama walaac ah qabtid. Wac Help Me Grow Washington magaca Family Resources Coordinator (Isuduwaха Khayraadka Qoyska, FRC) ee deegaanka kaas oo ku caawin kara.

Bixiyaasha:

Carruurtu waxay u koraan oo u kobcaan siyaabo kala duwan. Fadlan isku day oo kala hadal qoysaska horumarka ilmahooda si joogto ah. Waydii xirfadaha cusub ee ilmahoodu bartay, tabashooyinka ay qabaan oo la wadaag indho-indhayntaada. U sheeg qoysaska in haddii ay qabaan tabasho, macluumaad dheeraad ah iyo caawimo la heli karo iyaga oo wacaya lambarka Help Me Grow Washington. Waxay qoyska u gudbin doonaan Family Resources Coordinator (Isuduwaха Khayraadka Qoyska, FRC) ee deegaanka ee aaggooda. Waxaad sidoo kale wici kartaa Help Me Grow Washington si aad u hesho magaca iyo lambarka taleefanka FRC oo aad xogtan si toos ah ula wadaagto qoyska.

DCYF ma takoorto waxayna usisaa helitaan siman barnamijyadeeda iyo adeegyadeeda dhamaan dadka iyadoon loo tixgalin isirka, midabka, jinsiga, diinta, caqiidada, xaalada guur, dhalashada, rabitaanka galmo, da'da, xaalad ciidan ama jiritaanka naafio jidheed, dareen ama maskaxeed.

Haddii aad rabto nuqullo dhukumanti ah oo qaab kale ah ama luuqad kale ah, fadlan kala xidhiidh DCYF Constituent Relations (DCYC Xidhiidhiyaha Qaybaha Taleefanka) 1-800-723-4831 ama iimaylka communications@dcyf.wa.gov. DCYF PUBLICATION FS_0030 | DEL TI-002 SM (07-2023) Somali

Dhalashada -3 Bilood Miyuu ilmahaagu...

- ❑ Kor u qaadaa madaxiisa iyo laabtiisa markuu caloosha u jifo
- ❑ U dhaqdhaqaajiyaa gacmihiisa iyo lugijiisa si fudud
- ❑ Raacea dhaqdhaqaaqyada isago u rogoraya madaxiisa dhinac-dhinac
- ❑ Si fudud u qaadaa caagad ama naaska una nuugaa si fiican
- ❑ Uga yaabaa ama uga ooyaa codadka dhaadheer ee kadiska ah
- ❑ Kusoo eegaa, daawadaa wajigaaga
- ❑ Sameeyaa codadka gununuca ama layabka
- ❑ Dhoola cadeeyaa isago ka jawaabay dhoola cadeyntaada ama hadalkaaga
- ❑ Degnaadaa markuu faraxsan yahay

3 - 6 Bilood Miyuu ilmahaagu...

- ❑ Ku ciyaraa cagaha markuu dhabarka u jifo
- ❑ U qaadaa kor madaxiisa iyo laabtiisa isago gacmihiisa cuskanyaa markuu beerka u jifo
- ❑ Kor u qabtaa madaxiisa oo isdeejiyaa isago la caain
- ❑ Iskasoo rogoraa beerka ilaa dhabarka iyo dhabarka ilaa beerka
- ❑ Ku ciyaraa gacmihiisa isago isku taabanaya iyaga
- ❑ Gaadhaa baanbolada
- ❑ Soo qaadaa baanbolo uu gaadhayo
- ❑ Ujeedsadaa dhanka dhawaqa
- ❑ Sameeyaa codad badan oo kala duwan
- ❑ Kor u qoslaa
- ❑ Iskudayaan inuu muujiyo diidmo iyo doorbidis

6 - 12 Bilood Miyuu ilmahaagu...

- ❑ Isaso ururiya si uu istaago marka la caawiyo
- ❑ Fadhiistaa iyadoon la caawin markuu ku ciyaarayo baanbolo
- ❑ Ka wareejiyaa ashyaada hal gacan una wareejiyya midkale
- ❑ Iskisii u cunaa cuntada
- ❑ Iskudayaan inuu ku gacan haadiyo baay-baay
- ❑ Kugu dareensiyyaa baahiyiisa shucuur iyo codad
- ❑ Kudaydaa codadka hadalka ("ba-ba", "ga-ga")
- ❑ Qaataa markiisa markuu la ciyaarayo dadka waaweyn (ficiilada, codadka, ama xarakada wajiga)
- ❑ Ku dareensiyyaa inuu fahmay su'aal fudud ("Ma rabtaa inkale?")
- ❑ Ka yaqaan waalidka dadka kale

12 - 18 Bilood Miyuu ilmahaagu...

- ❑ Kaligii socdaa
- ❑ Soo qaadaa ashyaada yaryar (xajmiga yar)
- ❑ Ku ridaa ashyaada kana soo saara baaldiyada
- ❑ Dul dhigaa shay mid kale
- ❑ Iskii u isticmaalaan malqaacada
- ❑ Yidhaahdaa labo ama saddex kalmadowood oo kala duwan marka laga yimaado "Mama" ama "Aabo"
- ❑ Weydiyaa waxyaabo isago isticmaalaya kalmado
- ❑ Qabtaa oo ka cabaa koob isago yara daadinaya
- ❑ Tilmaamaan dhowr shay ama sawir marka la magacaabo

18 - 2 Sano Miyuu ilmahaagu...

- ❑ Fuulaa oo ka degaa kaababada isago qabsanaya
- ❑ Wax-sawiraa
- ❑ Dhaqaajiyaa jidhkiisa wakhtiga muusiga
- ❑ Isku keenaa kalmadaha ("sharaab badan")
- ❑ Bilaabaa inuu weydiyoo su'aalaha, ("sharaab?", "baay-baay?")
- ❑ Iskii u cunaa saanweyn, isago goosanaya
- ❑ Iska saaraa sharabaadada iyo kabaha
- ❑ La fiiriya sawirada buugta sheekada dadka waaweyn
- ❑ Sameeyaa doorashooyin fudud marka baanbolada (alaabaha ama gawaadhida)
- ❑ Ku daydaa ciyaarta canug kale (ciid tuurid, kubad tuurid)

2 - 3 Sano Miyuu ilmahaagu...

- ❑ Si fiican u socdaa, ordaa, istaagaa, tallaabsadaa una fadhiistaa
- ❑ Raseeyaa 3 shay ama ka badan
- ❑ Iisticmaalaan malqaacod iyo koob dhammaantood iskii
- ❑ Raacea tilmaamaha labo talaabo ("Soo qaad buuga oo dul dhig miiska")
- ❑ Magacaabaa shan ilaa lix qeybood oo jidhkiisa ah
- ❑ Ka qeybqaataa wadasheekaysiga fudud
- ❑ Ka jawaabaa su'aal fudud "maxay" iyo "maxaan sameeyaa" su'aalaha ah ("Maxaad u rabtaa qado?")
- ❑ Tilmaamaan magacaabaa ashyaada marka loo sheego isticmaalkooda ("Maxaad wax ku cabtaa?")
- ❑ Ka caawi shaqooyinka fudud (soo qaadista baanbolada)
- ❑ Iisticmaalaan 2-3 kalmadowood jumlad ah si joogto ah

3 - 4 Sano Miyuu ilmahaagu...

- ❑ Boodaa, ordaa, istuuraa, fuulaa, isago aan dheel-dheeliyayn
- ❑ Sawiraa goobooyinka, laymanka iyo iskutalaabaha isago isticmaalaya kalarka
- ❑ Iisticmaal boolbaro iyo agab kale si uu unoqdo mid ku ciyaaraya
- ❑ Ku raaxaystaa buugaagta sawirada iyo in la akhriyo
- ❑ Fahmaa ereyada sheegaya halka waxyaluhu yaallii (gadaasha, hoosta, gudaha, dusha sare)
- ❑ Iisticmaalaan hadal si dhibyar loo fahmi karo
- ❑ Weydii karaa waxbadan su'aalaha "sababta" iyo "waxa"
- ❑ Ku raaxaystaa la ciyaarista caruurga kale
- ❑ Sugaa markiisa mararka qaarkood
- ❑ Ka jawaabaa su'aalaha fudud "meesha" iyo "yaa"

4 - 5 Sano Miyuu ilmahaagu...

- ❑ Ciir-ciiraa, jaasaa ama ciyaaraa ciyaaraha kale kaasoo uu isticmaalayo murqaha waawayn (sida lugaha)
- ❑ Ku boodaa hal lug
- ❑ Sawiraa wax u eeg waji
- ❑ Xidhaa dharka isaga oo helaya caawimaad yar
- ❑ Waydiyaa su'aalo isago isticmaalaya "waxa, goobta, cida iyo sababta"
- ❑ U dhahaa inta badan hadalka si cad marka laga reebo erayada "s, z, th, iyo r"
- ❑ Adeegsadaa ereyada muujinaya cabbirka iyo tirada (weyn, badan)
- ❑ Sheegaa magaciisa koowaad iyo kan labaadba
- ❑ Ku raaxaystaa la ciyaarista caruurga ay isku da'da yihiin

5 - 6 Sano Miyuu ilmahaagu...

- ❑ Ku raaxaystaa qabashada, turista, laagista kubada
- ❑ Leeyahay dheelitir wanaagsan markuu ciyaaray ciyaaraha waawayn (calamadaha, ciir-ciirista, kubada kolaya)
- ❑ Ku raaxaystaa in uu wax kujaro maqaska
- ❑ Iskii u labistaa sida baldhan xidhashada, isqabdisiinta iyo suusad xidhistaa
- ❑ Muujiyaa danayn qorista erayad ah
- ❑ U hadlaa sida wadahadalka qoyska oo kale (wax aadeegsadaan erayo iyo weedho isku mid ah)
- ❑ Raacea tilmaamaha saddex-tallaabo ah sida ay u kala horreeyaan ("Kubbada hel, ku rid sanduuqa ay ku ciyaaraan, oo kaalay miiska.")
- ❑ Sheegi karaa magiiica oo saddexan, da'da iyo jinsiga
- ❑ Ku raaxaystaa la ciyaarista ciyaaraha habaysan ee carruurga kale (Simon ayaa dhahay, calaamada)

Kalaxidhiidh:

Barnaamijka Department of Children, Youth & Families Early Support for Infants and Toddlers (Kaalmada Caruurtayar ee Naafada ah iyo Socod-baradka ee Waaxda Caruurtay, Dhaliinyarada & Qoysaska) ee Gobolka Washington

PO Box 40970
Olympia, Washington
98504-0970

esit@dcyf.wa.gov

www.dcyf.wa.gov/services/child-development-supports/esit

Help Me Grow Washington
Taleefanka: 1-800-322-2588